San Diego Unified School District
Fact Sheet

Sannadka 2008 Shuruudaha Dugsiga Sare looga Qalin-jebineyo

Shuruudahan hoose ku qoran ayaa loo baahan yahay ardeydu si ay sannad-dugsiyeedka 2007-08 u qalin jebiyaan.

Imtixaanka looga Qalinjebineyo Dugsiyada Sare ee Callifornia (CAHSEE). Dhammaan ardeyda Dugsiyada sare ee guud ee California waxaa looga baahan yahay inay ku gudbaan labada qeybood ee imtixaankaka kooban yahay (Akhriska/qoraalka iyo Xisaabta) si shahaado loo guddoonsiiyo.

Dhibcaha. Ardey kasta waa inuu helaa wadarta dhibcaha 24 xilli dugsiyeedyada. Ardeydu waa inay gaahdaan Heerarka Dawad-goboleedka eeCalifornia xaga waxbarashadda ee maaddooyinka Ingiriisiga; xisaabta; saayniska; taariikhda/cilmiga bulshada; muuqaalka iyo badhigga farsahxanka; iyo barashadda jidh-dhiska. Ardeyda heli weyda buundooyinkii looga baahnaa looma oggolaaneyo inay ka qeyb galaan xaflada qalin jebinta iyo bandhigyada kale ee sannadka dugsiga sare ugu dambeysa la sameynayo.

OO KOOBAN

Ardeyda qalinjebineysa sannadka 2008 waa inay:

- ❖ Dhibcaha 44 xilli dugsiyeed ayaa loo baahan yahay si loo qalinjebiyo
- ❖ Ingiriisiga: Dhibcaha 8 xilli dugsiyeed
  - Xisaabta: Dhibcaha 6 xilli dugsiyeed
  - PE: Dhibcaha 4 xilli dugsiyeed
  - Saaynis: Dhibcaha 6 xilli dugsiyeed
  - Cilmiga Bulshadda: Dhibcaha 6 xilli dugsiyeed
  - Farshaxanka Shaqo : Dhibcaha 3 xilli dugsiyeed
  - Doorashooyinka ah: Dhibcaha 11 xilli dugsiyeed
    - ❖ Koombiyuutarka aqoon u leeyahay
    - ❖ Bandhigga ay sameyneyaan Ardeyda Sannadkaas dugsiu ugu dambeeyo
    - ❖ Ku gudbaa laba qeybood ee Imtixaanka CAHSEE ka kooban yahay
    - ❖ Muujiyaa akhlaaq wanaagsan

- Af Ingiriisiga: Dhibcaha 8 xilli dugsiyeed

  Fasalka 9aad: Laba dhibcood; Fasalka 10aad: Laba dhibcood; Fasalka 11aad iyo 12aad: Afar dhibcood, taas oo ay ku jirto hal dhibic oo ah koorsada Suugaanta Maraykanka ahmiyada saarta. Iyo saddex dhibcood oo ah sida liiska korsooyinka ku taxan. Masraxiyada, khudbad jeedinta, iyo saxaafada toona dhibcaha Ingiriisiga la iskuma siin doono. Masraxiyada waxaa dhibco lagaga helayaa qeybta muuqaalka iyo sameynta farshaxanka, saxaafadana waxaa dhibco lagaga helayaa farshaxanka gacanta lagu sameeyey. Barashadda af Ingiriisiga loo baraneyo Luuqad Labaad ahaan (ESL) waxaa laga yaabaa in loo isticmaalo buuxinta shuruudaha af Ingiriisiga ee 8-xilli dugsi la isaga baahnaa.

- Cilmiga Bulshadda: Dhibcaha 6 xilli dugsiyeed
  Fasalka 9aad ama 10aad : 2 dhibcood oo Taariikhda Adduunka iyo Juqraafi ah, fasalka 11aad: 2 dhibcood oo Taariikhda iyo Juqraafiga Maraykanka ah, iyo 1 dhibic waxaa lagu beddeli karaa qaadashada koorsooyin sare.mid kasta oo ah. Fasalka 12aad: hal dhibic oo ah barashadda Dawlada iyo dhibic oo dhaqaalaha ama laba dhibcood oo ah kuwa kale oo la dooran karo oo la ansaxiyey.

- Saaynis: Dhibcaha 6 xilli dugsiyeed

  Hal sanno oo Saayniska Nolosha ah (Baayoloji ama Maaddooyinka koorsada “d” ee sheybaadhka saayniska oo ah mid ay ansaxisay Jaamacada California), hal sanno oo fisikal saaynis ah (fisigis, kimistari, ama Maaddooyinka koorsada “d” ee sheybaadhka saayniska oo ah mid ay ansaxisay Jaamacada California. Iyo hal koorso oo ah koorsooyinka saayniska ee ‘d’ ee ay jaamacadda California ansaxisay (sheybaadhka saayniska) ama ‘’g’ maadooyinka (la dooran karo).

- Xisaabta: Dhibcaha 6 xili dugsiyeed
  Ardeyda waxaa loo baahan yahay inay ku gudbaan dhibcaha xisaabta ee lix xilli dugsiyeed, taas oo ay ku jiraan Aljebra 1-2, sahanka Aljebrada ee fasalka 9aad 1-2, ama Sannadka 1 ee Xisaabta Iskudhafka ah*; Joometeri 1-2 ama Sannadka 2 ee Xisaabta Iskudhafka ah*; iyo mid ka mid ah kuwan soo socda: Aljebrada Dhexe, Aljebrada Middeysan ama Joometeri 1-2, ama Sannadka 3 ee Xisaabta Iskudhafka ah*.
  (*Goobo la ansaxiyey ayaa laga heli karaa.)

- Ciyaaraha Jimicsiga: Dhibcaha 4 xilli dugsiyeed
  Ardeydu waa inay koorsada ciyaaraha jimcisiga (PE) iska diiwaan geliyaan marka ay bilaabeyaan faalka 9aad, aana inay helaan afar dhibcood inta ay dhiganeyaan fasalada 9aad ilaa iyo 12aad.

-Wey Socotaa-

- Luuqadaha Adduunka iyo Muuqaalka iyo soo Bandhigista iyo farshaxanka gacanta lagu sameeyey:
  Dhibcaha 3 xilli dugsiyeed waxyaabahan soo socda midkood ikhtiyaar ahaan loo qaadaneyo:

- Ikhtiyaarka A: 2 xilli dugsi oo luuqadaha adduunka ah(koorso hal sanno ah) iyo 1 xili dugsi oo muuqaaka iyo soo bandhigista iyo farshaxanka gacanta lagu sameeyey, ama
- Ikhtiyaarka B: 2 muuqaalka iyo soo bandhigista farshaxanka ah iyo 1 xilli dugsi farshaxanka gacanta lagu sameeyey ah. Muuqaalka iyo soo bandhigista farshaxanka waxaa ka mid ah koorsooyinka farshaxanka, muusikada, iyo farshaxanada masraxiyada /tiyaatarka. Farshaxanka gacanta lagu qabaneyo waxaa ka mid ah koorsooyinka waxbarashadda ganacsiga, barashadda qoyska iyo dadka wax isticmaala (consumer), waxbarashadda warshadaha, barnaamijyada shaqooyinka iyo shaqooyinka xirfadaha, waxbarashadda telefishinka, saxaafada iyo buugga-sannadka.

- Doorashooyin ah: Dhibcaha 11 xilli dugsiyeed

  Waxaa loo baahan yahay dhibcooyin dheeraad ah si loo buuxiyo 44 xilli dugsi dhibcood si loo dhammeystiro, taasna waxaa lagu heli karaa iyadoo koorsooyin dheeraad ah laga qaato maadooyinka kor lagu xusay ama koorsoyinka la dooraneyo. Koorsooyinka adeegsaneya luuqada aan tan af Ingiriisiga ah ee ardeyda aan af Ingiriisiga si faseex ah ugu hadlin waxaa lagu beddeli karaa shuruudaha maaddooyin gaar ah oo la isaga baahan yahay.
- Celceliska Buundooyinka: Celceliska buundooyinka ee 2.0 ama in ka badan ayaa helitaanka deeqda waxbarashadda looga baahan yahay, waxaana lagu xisaabiyaa sidatan A=4, B=3, C=2, D=1, F=0. Celceliska buundooyinka qalinjebinta waxaa lagu xisaabiyaa korsooyinka lagu dhammeeyey intii la dhiganyey fasalada 9aad ilaa iyo 12aad. (Ardeydu waa inay kala tashadaan la-taliyaha waxbrashadda ee dugsiga warbixinada ku saabsan siyaabaha loo xisaabiyo celceliska buundooyinka ee koorsooyinka mar kale lagu noqdey.) Meeleynta sare(AP) iyo koorsooyinka shahaadad jaamacada ee caalamiga ah (IB), celceliska buundooyinka waxaa lagu xisaabiyaa cabbir ah shan dhibcood: A=5, B=4, C=3, D=1, F=0. Laga bilaabo sannad-dugsiyeedka 2000- 2001, Ardeydu waa inay qaataan imtixaanda loo yeqaano College Board AP ama IB si ay u helaan dhibco miisaan leh. Warbixinada koorsooyinka lagu cabbirka san-dhibcoodlaha lagu sameeyey dugsiga ayaa laga heli karaa. Ardeygu si uu uga qeybgalo barnaamijyada la xidhiidha waxyaabaha manhajka dugsiga ka baxsan sida dhacdooyinka ciyaaraha fudud ee dugsiyada dhex mara, waxaa looga baahan yahay inuu keeno celceliska buundooyinka 2.0 ee cabbirka afarta dhibcood xaga deeqda waxbarashadda iyo akhlaaqda labadaba. Waalidiinta ama dadka ilmaha masuulka ka ah waa in talo bixin laga siiyaa siyaabaha lagu helayo deeqda ay dawlad-goboleedku bixineyso si laysagaga bixiyo kharashka imtixaanka meeleynta sare ee uu dhigeyo qoddobka 52244. (Ka timid Sharciyada California, Sharciyada Waxbarashadda, Qoddobka 48980). Wixii faahfaahin ah waxaad kala xidhiidhaa dugsiga uu ilmahaagu dhigto.
- Aqoonta Koombiyuutarka: Ardeyd kastaa waa inuu muujiyaa inuu koombiyuutarka aqoon u leeyahay muujiyaan, iyagoo koorso la ansaxiyey qaadaneya ama inay si wanaagsan ugu gudbaan imtixaanka degmada.
- Bandhigga ay sameyneyaan ardeyda uu sannadkaas dugsigu ugu dambeeyo: Dhammaan ardeyda qalinjebineysa waa inay sameeyaan bandhigga looga baahan yahay ardeyda ku jirta sannadka dugsiga ugu dambeeya, taas oo ka mid ah shuruudaha qalinjebinta. Warbixinada ku saabsan bandhigyadaas waxaa laga heli karaa dugsiyo gaar ah.
- Aqoonta Koombiyuutarka: Dhammaan ardeydu waa inay muujiyaan inay koombiyuutarka aqoon u leeyihiin inta ay ku jiraan fasalada 7aad ilaa iyo 12aad, iyagoo koorso la ansaxiyey qaadaneya ama inay si wanaagsan ugu gudbaan imtixaanka degmada.
- Imaanshaha Dugsiga: Ardey kasta dhigata fasalada 9aad ilaa iyo 12aad waa inay ka qeybgalaan siddeed xilli-dugsiyeed oo maalintiiba ay tahay lix xiisadood, haddii danta ardeyga darteed aan qorshe kale oo ka duwan loo sameyn. Maamulaha iyo waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah waa inay ansaxiyaan qorshayaasha kale ee diiwaangelinta ardeyda, taas oo ay ka mid tahay barnaamijka waxbarashadda la dedejineyo ama jadwal maalmeedka la soo gaabiyey, ee la-taliyaha waxbarashaddu uu qorshahaas ardeyga kula taliyey. Haddii barnaamjka ardeyga ee sannadkaas loo beddelo in ka yar lixdii xiiso ee uu qaadan jirey, waa in marka hore la wargeliya waalidka ama qofka ilmaha masuulka ka ah.
- Akhlaaqda: Ardey kasta wuxuu masuul ka yahay inuu akhlaaq wanaagsan muujiyo. Ardeygu si uu uga qeybgalo xaflada qalinjebinta, waa inuu keenaa ugu yaraan 2.0 ee Celceliska Buundooyinka xaga akhlaaqda inta uu ku jiro sannadka dugsiga ugu dambeeya.

SOMALI VERSION: 2008 HSGRADUATION REQUIREMENTS